



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod. 39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 6aad	Kulanka: 1aad
Taariikhda: 01/03/2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:40 AM	Saacadda uu Xirmay: 12:00 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi.	Guntanka Kulanka: 28 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka XFS Mudane Xasan Macalin. 2. Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Qorsheynta Mudane Axmed nuur Sheekh Maxamed.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhriinta Ayadaha Qur'aanka 2. Ansaxinta ajendaha 3. Akhrinta 1 ^{aad} ee Hindise sharciyeedka Kaalmo Sharciyeedka Federaalka. 4. Akhrinta 1 ^{aad} ee Hindise sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed.

Furitaanka Kulanka:

Senator Ibraahim Awgaab Cusmaan ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendaha kulanka, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 27 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: 1 senator

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Cadaaladda iyo Arimaha Dastuurka XFS Mudane Xasan Macalin, si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 1aad ee Hindise sharciyeedka Kaalmo Sharciyeedka Federaalka. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa sido kale u yeeray Wasiiru-Dowlaha Wasaaradda Qorsheynta Mudane Axmed nuur Sheekh Maxamed, si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 1aad ee Hindise sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray maamulka Golaha in Hindise sharciyeedka Kaalmo Sharciyeedka Federaalka iyo Hindise sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed loo gudbiyo Guddiyada ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa kulanka soo xiray Sacadu markay ahayd **12:00 PM**.

DHAMAAD